

# Shuruucda Heerke Shaqaale ee Seattle 2024

Shaqada Xafiiska Heerka Shaqaaluhu waa in uu hormariyo heerka isaga oo adeegsanaya bulsho naxariis leh iyo hawlo shaqo, khidad uu ku dhaqan galinayo iyo curin shuruuc ikhtiyaar, taas oo loogu talo galay tartan iyo sinaan bulsho.



Warqadan waa in lagu dhajiyaa meel la arkayo oo goobta shaqo ah, iyada oo af Ingiriisi iyo luuqadaha ay ku hadlaan shaqaaluhu ah.

Xafiiska Heerka Shaqaalaha wuu turjumaa, turjumaan ayuu u qabtaa, waxaanu qabtaa adeega dadka laxaadka la'.

## Mushaharka Ugu Yar

### SAMAYNTA MUSHAHARKA UGU YAR EE SHAQAALAHA

#### Loo Shaqeeyo Wayn

(501 RUUX AMA SHAQAALE KA BADAN)

**\$19.97**

SAACADII

#### Loo Shaqeeye Yar

(500 RUUX AMA KAYAR)

**\$19.97**

SAACADII

**\$17.25**

SAACADII

#### Xajmiha Loo Shaqeeyaha

Tiri tirada shaqaale ee dhamaan caalamka oo dhan ee loo shaqeeyaha. Gaybaha meelaha kale, tiri dhamaan shaqaalaha daladiisa qaybaha ah.

#### Gunooyinka Caafimaadka - Loo Shaqeeyaha Yar

Si aad u bixiyo mushaharka saacadii ee ugu yar, loo shaqeeyaha yar waa inuu bixiyaa heerka qalinka ama caymiska gunada caafimaadka ee ka saraysa sida lagu sheegey Sharciga Daryeelka La Awoodo ee federalka.

» Loo shaqeeyaha yar ma ni mushaharka kayar mushaharka ugu yar ma bixin karo hadii shaqaaluhu diido ama aanu u qalmin, loo shaqeeyaha yar ma bixin karo mushaharka ugu yar hadii shaqaaluhu diido ama aanu u qalmin gunada caafimaadka.

## Fasax Xanuun oo Mushahar Lagu Qaato & Wakhti Dheeraad ah

### WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN LA BIXIYO MUSHAHARKA WIXII FASAX XANUUN AH AMA BADBAADADA LA XIDHIIDHA

Loo shaqeeyayaashu waa in ay shaqaalaha siiyaan daryeel fasax mushahar leh iyaga ama xubnahooda qoyska.

(Ilmo, Waalid, Xaas, Lamaanaha Duwaangashan, Awow iyo Ayeeyo, Caruurta Awowga loo yahay, Walaalo)

**Fasaxa Xanuunka:** Xaalad xanuun jidheed ama maskaxeed, oo ay kamid tahay balan caafimaad

**Wakhtiga Badbaadada ah:** Sababaha la xidhiidha tacadi guriga dhaxdiisa ah, kufsi, qof cid aanu ogayni daba gurayso ama xaaladaha caafimaadka shacabka\*

### Xadiga Mushaharka Fasaxyada Xanuunka & Wakhtiga Badbaadada (PSST)

**Xajmiha Loo Shaqeeyaha**  
WAX U DHIGMA SHAQADA MAALIN OO DHAN SHAQAALAHA (FTEs) ADDUUNKA OO DHAN

**Ururta ulaa PSST**  
OO SAACADOOD OO SHAQO

**Loo gudbinayo inta aan la isticmaalin ee PSST**  
SANADKII

HEERKA 1	HEERKA 2	HEERKA 3
<b>Ilaa 49</b> FTEs	<b>50 - 249</b> FTEs	<b>250+</b> FTEs
<b>1 saac</b> 40-KII SAACADOODBA	<b>1 saac</b> 40-KII SAACADOODBA	<b>1 saac</b> 30-KII SAACADOODBA
<b>40 saacadood</b>	<b>56 saacadood</b>	<b>72 saacadood**</b>

\* WAKHTIGA BADBAADADA WAXAA SIDOO KALE LOO ISTICMAALI KARAA IN LA DARYEEO XUBIN QOYSKA AH  
\*\* XEERKA 108 SAACADOOD TIER 3-BA OO LOO SHAQEYUHU MUSHAHAR DHAMAYSTRAN BIXIYAAN (PTO)

## Shaqo Isku Fursad ah

### ISTICMAAL XADIDAN OO DUWAANKA XADHIGA IYO XUKUNKA AH

#### Waxyaabaha Mamnuuca Ah:

- Xayaysiis shaqo oo laga reebayo dadka soo dalbanaya ee ay duwaankooda ku jirto xadhig ama xukun
- Arji shaqo oo ay la socoto su'aalo duwaan xadhig ama xukun, isaga oo loo shaqeeyuhu uu hore ugu kala saaray arjiyada waxa ugu yar ee loo baahan moojee
- Diidmo shaqo (ama talaabooyin shaqada u diidaya cid oo kale) kaas oo ku salaysan kaliya xadhiga

**Waxyaabaha qaar laga soo reebaa way jiraa, waxaa kamid ah shaqooyinka caruur aan la ilaalin oo 16 jir kayar, dadka qaba laxaad la'aanta koriinka, ama dadka waawayn ee nuqul**

#### Loo shaqeeyayaasha waxaa looga baahan yahay inay:

Dib u dhigaan eegida taariikhdiis hore ee danbi ilaa ay ku kala saarayaan arjiyada shuruudaha ugu yar ee loo baahan yahay inay buuxiyaan

Raacaan nidaamka kahor intaan laga hadal talaabada diidmada ah eek u samaysan taariikh danbiyeedka qofka:

- » In fursad lasiiyo uu ku sharaxayo ama in la eego xogta saxda ah ee taariikhda danbiga
- » In shaqadaasi banaanaato ugu yaraan labo maalmood oo shaqo
- » Haysashada sabab macquul ah oo in shaqaalayta qofkani wax u dhimayso shaqada ama ay saamayn ku yeelanayso awooda shaqaaluhu ku gudanayo shaqadiisa

## Xatooyada Mushaharka

### WAXA UU MUSHAHARKA KA ILAALIYAA IN LA XADO

Loo shaqeeyuhu waa in uu bixiyaa gunada lagu leeyahy si joogto ah maalinta mushaharka waana in uu shaqaalaha siiyaa xog qoran oo ku saabsan shaqadooda iyo musharkooda.

#### Xogtan qoran waa inay kamid ahaataa:

- Magaca loo shaqeeyaha iyo cinwaanka lagala xidhiidhayo
- Musharka shaqaalaha lasiiyo, in uu u qalmo wixii ofertaym ah, waxa mushaharku ku salaysan yahay (saacado, shifti, maalin, todobaad, khidmad), iyo maalinta mushaharka ee caadiga ah
- Sharaxaada qawaaniinta loo shaqeeyaha
- Qoraal shay shay u sharaxaya xogta musharka la bixinayo maalinti mushaharka

#### Tusaalayaasha shuruudaha mushaharka:

- Bixinta mushaharka ugu yar
- Bixinta ofertaymka
- Bixinta mushaharka nasashada
- Bixinta wixii la balan qaaday
- Bixinta mushaharka shaqadii la qabtay wakhtiga fasaxa
- Bixinta khidmada
- Bixinta kharashka deegyada (hadii ayna ku qornayn risiidhka ama shaxda alaabta in aan la siinaynin shaqaala u shaqaynaya macaamiisha)
- U gudida wixii kharash ah ee shaqaalaha ka baxay
- In aan si khalidan loogu kala saarin shaqaalaha

## Dheefaha Dadka Sida Joogtada Ah Tareenka U Raaca

Shaqo bixiyayaasha leh in kabadan 20 shaqaalo, waa in ay siiyaan shaqaalaha, kuwaas oo shaqeeya qayaas ahaan toban saacadood ama in kabadan usbuucii, in mushaharka la jaro lacag si ay uhelaan ticketka vanpoolka ama transitka si looga jaro kharashaadka ku baxa shaqaalaha kahor inta aan la cashuurin, ilaa heerka ugu sareeya ee sharciga cashuurta federaalka ogolyahay. Si loo buuxiyo shuruudaha, loo shaqeeyaha waa in uu bixini karo tigitka tareenka lagu raaco oo gebi ahaanba ama qayb kamid ah la kaabay. Loo shaqeeyayaashu waa inay ku bixiyaan gunadan 60 maalmood oo shaqo oo ka bilaabmaysa taariikhda ay bilaabanto shaqaalaysiintu.

## Nagala soo Xiriir



#### Shaqaalaha

Cabasho u gudbi OLS ama dacwad ka xarayso maxkamada

#### Loo shaqeeyayaasha

Hel kaalmo u hogaansanaan iyo/ama hel tobobar

**206-256-5297**

[www.seattle.gov/laborstandards](http://www.seattle.gov/laborstandards)

810 THIRD AVE, SUITE 375  
SEATTLE, WA 98104

LABORSTANDARDS@SEATTLE.GOV